# Kooxda Xiriirka Caalamiga ee Soomaaliya
# 21-22 Abriil 2010, Qaahira
# Warmurtiyeed

Kulankii 17aad ee Kooxda Xiriirka Caalamiga ee Soomaaliya (ICG) ayaa lagu qabtay magaalada Qaahira, ee dalka Masar intii u dhexeysay 21-22 bishan Abriil, waxaana shirguddoomiyay Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Ahmedou Ould-Abdallah. Kulanka waxaa ka hadlay Xoghayaha Guud ee Jaamacadda Dowladaha Carabta, Camr Musa iyo Wasiirka Arrimaha Dibadda Soomaaliya, Cali Axmed Jaamac.

Kooxda ICG waxay soo dhoweynaysaa horumarka ay Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ka gaartay la xiriirka kooxaha doonaya inay ku soo biiraan geeddi socodka nabadda. Waxay si gaar ah u soo dhoweynaysaa heshiiskii ay Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka iyo Ururka Ahlu Sunna Wal Jama'a ku kala saxiixdeen 15kii bishii Maarso ee 2010ka, waxayna u aragtaa inuu yahay tallaabo muhimsan oo hore loo qaaday waxayna ku baaqaysaa in sida ugu dhakhsiyaha badan si buuxda loo fuliyo. ICG-du waxay heshiiskan u aqoonsantahay inuu tusaale u noqon karo wax wada qabsi mustaqbalka lala yeesho kooxo kale, waxayna Dowladda TFG-da ugu baaqaysaa inay dardar geliso dadaalka ay ugu jirto inay la xiriirto kuwa doonaya nabad iyo xasillooni. Waxay soo dhoweynaysaa heshiiskii isafgaradka ahaa ee ay wada gaareen Dowladda TFG-da iyo Puntland 12kii bisha Abriil 2010 kuna saabsanaa wax ka qabashada burcad badeedda.

Kooxda ICG waxay ku nuuxnuuxsanaysaa inay laga ma maarmaan tahay in la ilaaliyo lana taageero dhammaan Hay'adaha Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka (TFIs), waana inaan la siyaasadeynin gudahana laga soo dumin. Waxay ugu baaqaysaa dhammaan qaybaha hay'adaha Dowladda (TFIs) inay xalliyaan kala qaybsanaantooda muujiyaanna sida ay uga go'antahay inay muujiyaan midnimadooda iyo inay ka wada shaqeeyaan soo celinta nabadda iyo taageerada dadweynaha.

Kooxda ICG waxay ugu baaqaysaa Dowladda TFG-da inay sii wado hawsha yididiilada leh ee ka billaabatay faafinta miisaaniyadda si loo soo bandhigo xisaabaad hufan oo aan mugdi ku jirin ee xagga maaliyaddeeda. Hufanaan dheeraad ah ee xagga xisaabaadka ah waxay sare u qaadeysaa kalsoonida bulshada caalamka ee deeqda bixisa.

Kooxda ICG waxay rumeysantahay inay tahay in Dowladda TFG-du ay diiradda saarto hawlaha ku meelgaarka oo soo hormariso kuwa ugu muhimsan si ay ugu suurtogeliso bulshada caalamka inay taageeradeeda ugu hagto dhinacyada ugu muhimsan. Gaar ahaana, waxay ku baaqaysaa in qabyada qoraalka dastuurka sida ugu dhakhsiyaha badan loo soo saaro. Run ahaantii, Kooxda ICG waxay

rumeysantahay in hawsha qoraalka qabyada dastuurka loo baahanyahay inay noqoto mid la qaadan karo laguna soo daro wada tashi ballaaran. Sidoo kale Kooxda ICG waxay Dowladda TFG-da ku dhiirrigelinaysaa inay dejiso istaraatiijiyad looga baxayo marxaladda ku meelgaarka ah oo dhammaanaysa bisha Agoosto 2011.

Kooxda ICG waxay ku baaqaysaa in Guddiga Wadajirka iyo Guddiga Heerka Sare ay kulammadooda ku qabtaan magaalada Muqdisho.

Kooxda ICG waxay xubnaheeda ugu baaqaysaa inay isuduwaan oo wax wadaqabsi ka yeeshaan dhammaan dadaalkooda si la isaga ilaaliyo duldulleelada, ku celcelinta iyo labalaabidda hawlaha iyo si loo abuuro wadashaqayn. Kooxda ICG waxay isla ogolaatay in si ballaaran xogta la isu weydaarsado oo istaraatejiyadana la is waafijiyo si loo kordhiyo taageerada la siiyo Dowladda TFG-da.

Kooxda ICG waxay Dowladda TFG-da ugu baaqaysaa inay sii waddo dadaalka ay ugu jirto inay dibuhabayn ku sameyso booliskeeda iyo ciidankeeda amaanka iyo hanaanka kormeer iyo la xisaabtan ee arrintaa la socota. Waxay soo dhoweynaysaa taageerada ay Dowladda Japan iyo Midowga Yurub u fidiyeen dibuhabaynta booliska Dowladda TFG, iyo weliba tababarka ay Midowga Yurub, Dowladaha Uganda iyo Maraykanka u billaabeen ciidamada amaanka. Waxay soo dhoweynaysaa taageerada ay Dowladda Japan u fidiso dadaalka dibuhabaynta booliiska Dowladda TFG-da. Waxay xubnaheeda ku dhiirigelinaysaa ma aha keliya inay sii wadaan qaybta muhimsan ee ay ka qaadanayaan tababarka ciidamada, balse inay xaqiijiyaan in ciidanka qaata tababar horey loo ogolaaday si dhab ah loo qalabeeyo lana siiyo mushaaraad iyo gunnooyin in muddo ah oo ku habboon.

Kooxda ICG waxay caddeynaysaa inay taageero buuxda u hayso Ciidanada Nabadilaalada Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) waxayna xubnaheeda ugu baaqaysaa inay siiyaan taageero dheeraad ah oo isuduwan oo ku timaada waqtigii ku habboonayd. Waxay dowladaha Uganda iyo Burundi ugu mahadnaqaysaa ka qaybqaadashadooda sii socota ee nabadilaalinta waxayna ugu baaqaysaa xubnaha kale ee Midowga Afrika inay hawsha nabadilaalinta ciidamo u soo diraan. Bulshada Caalamku waxay diyaar la tahay inay taageerto ballaarinta ciidanka AMISOM ee hadda jooga. Kooxda ICG waxay filaysaa in la soo diri doono inta ka hartay lacagihii lagu ballanqaaday shirkii Brussels.

Kooxda ICG waxay si adag u cambaareynaysaa falalka xoogga ah ee kooxaha xagjirka ee dhibaatada iyo rafaadka sii socda u keenay dadweynaha rayidka ah. Waxay cambaareynaysaa weerarrada lagu hayo saxafiyiinta, dadka ka shaqeeya xuquuqda aadanaha, garsooreyaasha iyo hay’adaha aan dowliga ahayn waxayna ku baaqaysaa in dhinacyada oo dhami ay dhowraan xuquuqda aadanaha iyo

xoriyadda warbaahinta. Waxay si adag u cambaareynaysaa arrinta ah in dad badan oo Soomaali ahi aan weli lagu la xisaabtamin dembiyada ay galeen.

Kooxda ICG waxay si buuxda u taageeraysaa go'aanka ah in shir Soomaaliya loo qabto bisha soo socota waxayna soo dhoweynaysaa Turkiya oo ku deeqday inay shirka ku martigeliso magaalada Istanbul. Waxay remaysantahay in shirkan uu yahay qayb muhim ah oo ka mid ah taagerada caalamiga ah ee loo fidiyo Dowladda Ku Meelgaarka waxayna soo dhoweynaysaa ka qaybgalka ganacsatada gaarka ah iyo jaaliyadda dibadda ku nool si shaqo loo abuuro. Kooxda ICG waxay rumeysantahay in dib-u-dhis iyo horumain ay muhim u yihiin xasilloonida siyaasadeed iyo nabadgelyada Soomaaliya.

Kooxda ICG waxay ammaan u soo jeedinaysaa Ururka Caalamka Islaamka oo xafiis ka furtay magaalada Muqdisho waxayna ku dhiiragelinaysaa inuu sii wado hawlihiisa gargaar baniaadanimada ah.

Kooxda ICG waxay cambaareynaysaa falalka burcad badeedda sii socda waxayna ku baaqaysaa wada shaqayn dheeraad ah oo caalamku ka yeesho arrintan si loo horjoogsado loona dagaallamo burcad badeedda loona abaabulo mashaariic shaqo abuuris ah oo dhulka laga sameeyo. Kooxda ICG waxay soo dhoweynaysaa dhiirrigelinaysaana ciidamada badaha caalamiga ah ee jooga badaha ku dhow xeebaha Soomaaliya.

Kooxda ICG waxay garanaysaa in Dowladda TFG ay ku shaqaynayso duruufo aad u adag. Sidaa daraadeed, waxay mudantahay in dadka Soomaaliyeed iyo Bulshada Caalamkuba ay u fidiyaan taageero iyo garowsi intaa ka weyn ee dhan walba leh.

Dowladda Spain ayaa iyadoo ku mahadsan ku ballanqaaday inay martigeliso kulanka 18th ee Kooxda Xiriirka Caalamiga bisha Sebtembar 2010. Guddoonka ICG wuxuu dhiirrigelinayaa, kuna baaqayaa in kulanka si heer sare ah looga soo qaybgalo. Kooxda ICG waxay mahad u soo jeedinaysaa Jaamacadda Carabta sidii ay u soo diyaarisay una martigelisay kulankan iminka la soo gunaanaday.

Ka Qaybgalayaasha
Algeria, Austria, Belgium, Canada, China, Denmark, Jabuuti, Masar, Itoobiya, Finland, France, Italy, Japan, Kenya, Libya, Malaysia, Norway, Cumaan, Qatar, Russia, Sacuudi Carabiya, Soomaaliya, Koonfur Afrika, Spain, Suudaan, Sweden, Turkey, Ingiriiska, Maraykanka, Yaman, Midowga Afrika, Midowga Yurub, Bangiga Horumarinta Islaamka, Urur Goboleedka IGAD, Jaamacadda Dowladaha Carabta, Ururka Caalamka Islaamka, Qaramada Midoobay, Bangiga Adduunka.